Hawlgalka Kaalmaynta Qaramada Midoobay ee Soomaaliya (UNSOM)

Warbixin kooban oo uu Ergayga Gaarka ah ee QM, Nicholas Kay, u jeediyey Golaha Ammaanka ee Qaramada Midoobey

New York, 12 Sebtembar 2013

Mudane Madaxwayne, Xubnaha Golaha.

Aad baad ugu mahadsan tihiin fursaddan si aan markii ugu horreeysey warbixin ugu siiyo Golaha Ammaanka tan iyo markii la ii magacaabay Ergayga Gaarka ee QM ee Soomaaliya. Waxaan si gaar ah ugu faraxsan ahay inaan maanta halkan la imaado Danjire Annadif oo ka tirsan Midowga Afrika, isagoo metelaya wadashaqaynteenna dhow, xilli aannu gudanayno labada waajibaad ee naga saaran Golahan. Xilligan ayaa ah waqti ku habboon in wax la qiimeeyo Soomaaliya, hal sano kaddib markii la dhisay dowladda cusub ee Federaalka ah, iyo 90 maalmood kaddib markii la aasaasay Xafiiska UNSOM.

Mudane Madaxweyne,

Inta aanan si faahfaahsan uga hadlin arrimaha siyaasadda iyo amniga, aan ku bilaabo anigoo ka jawaabaya su'aasha ay Ergayda Gaarka ee QM ay u badan tahay inay maqlaan: "Rajo ma qabtaa?" Jawaabta kiiskaygu waa "haa". Waxaa is rog rogga, qalalaasaha iyo isqabqabsiga, ka dambeeysa inay Soomaaliya hadda leedahay aasaaskii horumarka: beesha caalamku waxay ku midaysan tahay in la helo dowlad federaal ah oo lagu kalsoonaan karo, islamarkaana sharciyaysan; waxaa jira tashiilaad la heli karo si loo daboolo baahiyaha deg degga ah; waxaa jira rabitaan siyaasadeed oo ah in la isu tanaasulo khilaafyadana lagu maareeyo iyadoo aan la adeegsan gacan ka hadal.

Dadka Soomaaliyeed ee aan la kulmayna waa ay ka daaleen dagaal iyo diif, oo waxay ka dheregsan yihiin siyaasadda qar iska tuurnimada iyo siyaasadda danaysiga ah. Wadnaha loollanka siyaasadeed waa mid ay fududahay in la qeexo, xitaa haddii ay adag tahay in la xalliyo. Kaddib 22 sano oo colaad ah, awooddii gacan ku haynta khayraadka iyo dakhliga ayaa kala qaybsan. Dowlad dhexe oo xooggani ma jirto.

Gobollo iyo dad kala duwan ayaa hadda kala haysta qaybo yar yar oo awoodeed. Taasina waa sababta ay Soomaalidu u go'aansatay qaabka federaalka oo ah nidaamka kaliya ee ku shaqayn doona xaqiiqadan cusub. Howshu hadda waa inay heshiiyaan oo ay dhexdooda isku raacaan sida saxda ah ee federaalku u shaqayn doono. Sidee bay awood, dhaqaale, dhaqaale iyo mas'uuliyadba u qaybsan doonaan si ay Soomaaliya oo dhan uga faa'iidaysato? Waa arrimo adag. Laakiin waa kuwo u baahan xal siyaasadeed.

Sidaa darteed, saddexdii bilood ee ugu horreeyey, aan mudnaanta u siiyey in horumar looga gaaro dib-u-eegista dastuurka iyo la shaqeynta wax ku oolka ah ee gobollada; isagoo u socdaalaya Puntland, Somaliland iyo la xaal si dhow ah oo ku saabsan su'aasha Jubbooyinka.

Mudane Madaxwayne,

Haddii toddobaadku uu siyaasadda ku dheeraado, sagaashanka maalmood ee UNSOM ee Soomaaliya waa wax badan. Aan idinka xog-siiyo dhowr arrimood oo muhiim ah oo dhowaan soo kordhay tan iyo warbixintii SG-ga. Xaaladda gobollada Jubbooyinka ayaa ka mid ahaa arrimihii ugu darnaa ee soo wajaha Dowladda Federaalka.

Horaantii bishii Juun, khataruhu waxay ahaayeen kuwo aad u sarreeya dhanka burbur ka dhasha ismariwaaga amni iyo kan siyaasadeed ee Kismaayo, iyo sidoo kale dhinacyada Jubba iyo Muqdisho. Si kastaba ha ahaatee, ugu dambayntii heshiis ayaa 28-kii Agoosto lagu gaarey Addis Ababa, iyada oo uu dhexdhexaadin firfircoon ka galay Wasiirka Arrimaha Dibedda Itoobiya, Dr Tedros Andhanom, oo wakiil ka ah IGAD, kaas oo lagu dejiyey maamul ku meel gaar ah, amniga iyo habaynta dhaqaalaha. Waxaan taageeray wada-xaajoodyadii gebogebada ahaa, waxaana ka qaybgalay xafladdii saxiixa ee Addis.

Qaar ka mid ah arrimaha waawaynaa ayaa weli taagan, hirgelintuna waxay u baahan doontaa niyad wanaag laga helo dhammaan dhinacyada iyo taageero mug leh. UNSOM, waan ku faraxsan ahay inaan iraahdo, waxay xarun ku yeelatay magaalada Kismaayo si ay u hubiso inay awood u leedahay inay caawiso sida looga baahan yahay dhammaan dhinacyada shaqada loo igmaday darteed, iyadoo si dhow ula shaqaysa Midowga Afrika. Waxaan ka walaacsan nahay inaan maqalno weerarka maanta lagu qaaday kolonyadii uu la socdey hoggaamiyaha KMG ah ee Maamulka Jubba, waxaana ku baaqay in la is dejiyo oo ay dhinacyada oo dhami is xakameeyaan.

Dhanka woqooyi, xiriirka Somaliland iyo Soomaaliya waa mid xasaasi ah oo jilicsan. Si kastaba ha ahaatee, waxaa jira horumar mudan in laga warbixiyo. Dhexdhexaadinta Turkiga, labada dhinac waxay ku yeesheen laba kalfadhi oo wadahadal ah sanadkan. Heshiiska maamulka hawada oo la wadaago ayaa moodal u noqon kara dhinacyada kale ee iskaashiyo faa'iidada leh.

Waxaan ku boorrinaynaa labada dhinacba inay diiradda saaraan xalalka, maaha dhibaatooyinka. Joogitaanka xafiiska UNSOM ee Somaliland ayaa wali hakad ku jiraa kaddib codsi uga yimid maamulka maxalliga ah oo aan aqbalsanayn in xafiiska UNSOM uu sharciyad ku leeyahay Somaliland. Waxaa iga go'an in aan helo qaab aan ku xalliyo ismari-waagan.

Waxaan sidoo kale ugu yaboohayaa Puntland xafiisyo wanaagsan oo ku aaddan dhanka hannaanka siyaasadeed ee gudaha iyo inay ka caawiyaan dhisidda kalsoonida maamulka Puntland iyo Dowladda Federaalka ah. Waxaan mar kale si dhow arrintan ugala shaqaynayaa Guddoomiyaha Golaha IGAD.

Mudane Madaxwayne,

Mid ka mid ah howlaha ugu muhiimsan ee Soomaaliya horyaalla waa in lagu heshiiyo Dastuur federaal ah oo kama dambays ah. Qaramada Midoobey waxa ay taageeraysaa hannaan ballaaran oo wadatashi dadwayne ah kaas oo qayaxaya dhowr meelood oo muhiim ah oo lagu muransan yahay.

Waxaa soo socda geeddi-socod dheer oo adag oo wadatashi iyo gorgortan ku dhisan, kaas oo aan taageerayno. 2dii Sebtembar, UNSOM waxay taageertay daah-furka shirwaynaha qaran ee siyaasadda, kaas oo uu cinwaankiisu yahay Higsiga 2016-ka, iyadoo uu Madaxwaynaha Soomaaliya ku celceliyay inay ka go'an tahay dastuur cusub iyo doorasho sanadka dhacda 2016-ka.

In ka yar hal toddobaad oo maanta ka bilaabma, waxaa la samayn doonaa dhisme kale oo muhiim u ah xasilinta Soomaaliya. Ilaa 200 oo ergo ayaa ku kulmi doona Brussels maalinta Isniinta ah, waxaana si wadajir ah u martigelinaya Midowga Yurub iyo Dowladda Federaalka ah.

Heshiishka New Deal Compact waa mudnaan gaar ah oo ay Soomaalidu hoggaaminayso iyaduna ay leedahay guulaha la gaarey, iyo qaab-dhismeedka taageerada caalamiga ah ee Soomaaliya, isku-dubbaridka iyo maalgelinta. Gudaha Brussels, Dowladda Soomaaliya iyo Beesha Caalamka ayaa ansixin doona Heshiiska si loo xaqiijiyo in labada dhinac ay ka go'an tahay arrimahan mudnaanta leh iyo sidii loo fulin lahaa.

Tijaabada dhabta ah ee Heshiisku waxay noqon doontaa sida uu wax uga bedelo nolol-maalmeedka dadka, QM Soomaaliya waxay si buuxda u qaadan doontaa doorkeeda, gaar ahaan caawinta dawladda si ay isugu duwdo gargaarka caalamiga ah. Waxaan uga mahadcelinayaa Midowga Yurub doorka muhiimka ah ee ay ku leeyihiin geeddi-socodkan, waxaanan sii wadaynaa inaan si dhow ugala shaqayno arrimahan iyo dhinacyada kale ee aan ka taageerno Soomaaliya guud ahaan. Waxaan rajaynayaa inaan arki doonno ballanqaad dhab ah oo ka yimaada saaxiibada, gaar ahaan hab-howleedyada cusub ee maaliyadeed iyo isuduwidda la soo jeediyey.

Markaa dhanka siyaasadda horumar baa ka muuqda. Baarlamaanku wuxuu muujiyay inuu yahay darawal muhiim ah. Laakin ma jirto meel la is dhigto. Waxaa weli jira waqti lagu heshiinayo dastuur cusub iyadoo loo marayo hannaan loo dhan yahay.

in loo codeeyo kaddibna la qabto doorasho xor iyo xalaal ah oo ka dhacda Soomaaliya. Laakiin waa buur wayn oo la fuulayo, dhammaanteen waxaan u baahan mahay inaan sare u qaadno xawaaraha.

Mudane Madaxwayne,

Marka laga reebo siyaasadda, inta badan diiradda bilowga ihi waxay saarnayd amniga. Joogitaankeenna Muqdisho ilaa xad waxaa suurtogal ka dhigay AMISOM oo qura. Waxaan bogaadinayaa geesinnimada, go'aanka iyo naf-hurnimada dalalka ciidamada iyo booliiska ku deeqay iyo hoggaanka Guddiga Midowga Afrika. Wejiga xiga wuxuu u baahan doonaa taageero dheeraad ah.

Baahiyaha saxda ah ee loo qabo awood kordhinta iyo badinta ciidanka, maalgelin ku filan oo la saadaalin karo iyo fikrad cusub oo howleed ayaa ka soo bixi doonta warbixinta howlgalka hal-beegga wadajirka ah ee UN-AU, bisha Oktoobar. Sida aad ka maqashaan saaxiibkay, Ambassador Annadif, weli ma dhammaan wejigii ciidan iyo amni ee looga adkaan lahaa Al Shabaabka Soomaaliya.

Ciidanka qaranka Soomaaliyeed waxa ay diyaar u yihiin in ay kaalintooda ka qaataan, waana in si sax ah loo garab istaagaa. Waxaan ugu baaqayaa Golaha inay hubiyaan in mudnaan dheeri ah la siiyo xoojinta Ciidamada Amniga Qaranka Soomaaliyeed iyo awooddooda ku aaddan joogteeyo ka qaybgalka howlgallada wadajirka ah ee AMISOM. Waxaan aaminsan ahay in tani ay noqon doonto mid ka mid ah gebagebada ugu muhiimsan ee kooxda bartilmaameedka.

Mudane Madaxwayne, Marka laga soo tago caqabadaha siyaasadda iyo amniga, QM waxa ay sidoo kale si firfircoon uga howlgashaa arrimaha kale ee muhiimka u ah Soomaaliya iyo gobolka: wax ka qabashada baahiyaha bani'aadminimo; xuquuqda aadanaha; sinnaanta jinsiga; iyo burcad-badeednimada.

Galaangalka ayaa weli ah caqabad wayn waxayna gacan ka geysatey fiditaanka deg degga ah ee cudurka dabaysha. Soomaaliya hadda waxaa ka jira in ka badan 160 xaaladood oo la xaqiijiyey, waana in ka badan kala bar kiisaska guud ee adduunka. Ololayaashii tallaalka qaranka ee muhiimka ah ayaa dhacay iyadoo shaqaalaha daryeelka caafimaadka ee maxalliga ihi ay ku dadaalayaan sidii loo gaari lahaa bulshooyinka.

Ka bixitaanka Hay'adda Medecins Sans Frontieres ayaa waxay dhabarjab wayn ku tahay waaxda caafimaadka waxayna xusuusinaysaa baahida loo qabo dhammaan in dhinacyadu ay ixtiraamaan sharciga caalamiga ah ee bani'aadminnimada iyo mabaadi'da bani'aadminnimada. In kasta oo aan aragnay xoogaa horumar ah, xaaladda sugnaanta cunnada ayaa weli ah mid khatar ah. Markii ugu horreeysey muddo 5 sanadood ah, tirada dadka dhibaataysan waxay ka hooseysaa hal milyan laakiin tirada dadka qarka u saaran cunno-yarida ayaa korortay oo gaartey 2.3 milyan oo qof. Waxaa laga yaabaa in arrintani ay sii xumaato haddii la dhimo lacagaha xawaaladaha Soomaalida ee soo marta bangiyada caalamiga ah.

Ilaa hal milyan oo qaxooti ah ayaa lagu martigeliyaa dalalka deriska la ah Soomaaliya. Iyadoo ay jirtay beryahan dambe in lagu riixo qaxootiga inay dib ugu soo laabtaan Soomaaliya, weli lama gaarin xilligii dib u celinta ballaaran ee dalkooda. Soo noqosho iskaa-wax-u-qabso ah oo meelaha nabdoon ka dhaca ayaa waxay u baahan yihiin, si kastaba ha ahaatee, in lagu taageero.

Waxaan ku faraxsan nahay inaan taageerno dhabbe-howleedka xuquul insaanka ee dowladda, qorshahooda waxqabad ee la horgeyn doono Guddiga Xuquuqul Insaanka ee Geneva dabayaaqada bishan. Iyo sida tallaabada muhiimka ah ee tan qorshe-hawleed, waxaan ugu baaqay Dowladda Soomaaliya inay ansixiso Axdiga Xuquuqda Carruurta. In carruur lagu ahaado Soomaaliya ayaa waxay noqon kartaa waayo-aragnimo cabsi leh.

Waxaan sii wadaynaa inaan si walaac leh ula soconno, xadgudubyo aad u wayn oo ka dhan ah xuquuqda carruurta. Dhanka wanaagsan marka laga eego carruurta Soomaaliya, ololaha ay Qaramada Midoobey taageerto ee "Aada Dugsiyada" ayaa la bilaabay Axaddii hore, kaas oo ay ujeeddadiisu tahay in hal milyan oo carruur ah la geeyo fasalka saddexda sano ee soo socota. Tallaabadii ugu horreeysey, waa markii ugu horreeysey muddo toban sano ah, in maanta 100,000 oo caruur ah ay dowladdu siinayso waxbarasho lacag la’aan ah.

Xadgudubyada galmoodka ee ka jira Soomaaliya ayaa isna ka mid ah caqabadaha ugu daran uguna deg degga badan ee xuquuqul insaanka ee horyaalla Dowladda iyo dadka. Ballanqaadka

Madaxwaynaha Soomaaliya iyo hoggaanka AMISOM ee ku aaddan dabiqidda siyaasad aan loo dulqaadanaynin xadgudubyada galmada waa mid dhiirri-gelin leh. Si kastaba ha ahaatee way caddahay in loo baahan yahay in la helo habab baaris iyo dacwad-oogid aad u adag, oo ay ku jiraan ilaalinta dadka dhibku gaarey iyo marqaatiyaasha.

Xilli ay burcad-badeednimadu ay sii yaraanayso, haddana lama baabi'in shabakadihii xeebaha ee ka macaashi jirey. Nidaamyada ilaalinta sharciga iyo sixitaanka ee dhulka, iyo sidoo kale fursadaha shaqo, waa in la taageero si aan u dawayno sababaha dhibaatada keenaya. Shir ay soo qaban qaabisay Dowladda Imaaraadka Carabta oo shalay ka dhacay magaalada Dubai ee dalka Isutagga Imaaraadka Carabta, ayaa waxaa looga hadlay istaraatiijiyad dhanka badda ah oo daboolaysa amniga iyo maaraynta khayraadka waara oo si adag loo ansixiyey. Imaaraadku wuxuu naga mudan yahay in aan uga mahadcelinno hindisahan qiimaha leh.

Mudane Madaxwayne,

Waxaan rabaa in aan Golaha uga mahadceliyo aragtidooda ku aaddan dhismaha UNSOM. Horumar wanaagsan ayaanu ka samaynaynaa samaynta howlgalkan, iyadoo ilaa hadda ay joogaan ilaa konton shaqaale ah. Awood badan oo dheeraad ah ayaa loo baahan yahay si aan u gudanno waajibaadka, laakiin waxaan ku ballaarin doonaa kaliya xowli noo ogolaanaya inaan noqonno wax ku ool ah islamarkaana ka tarjumaysa awoodda ay Dowladdu u leedahay inay liqdo gargaarkeenna. Waxtarkeennu waxa uu ku xiran yahay xiriirkeenna. Waxaan si gaar ah diiradda u saaray xiriirka aan la leenahay dowladda Federaalka oo aan aaminsan ahay inuu yahay mid xooggan. Midda labaad waa xiriirka QM iyo AMISOM.

Danjire Annadif iyo aniga waxaa naga go'an in kooxaheennu ay gacmaha is qabsadaan. Ma ahan wax iska dhacay inaan maanta si wadajir ah idiin xog-siinno. Waxaan sidoo kale si dhow ula shaqaynaa IGAD, waxaana rajaynayaa in shirka Madasha IGAD Partners' Forum lagu qabto halkan New York oo ah xarunta Golaha Guud.

Gudaha nidaamka Qaramada Midoobey waxaan sidoo kale diiradda saaray xiriirrada, kuwaas oo fure u ah waajibaadka UNSOM ee ah in "hal albaab oo Qaramada Midoobey ah" wx laga siiyo Dowladda Federaalka. Waxaan ku soconnaa in si rasmi ah loo mideeyo

Howlgalka marka la gaaro 1da Janaayo, waxayna horayba kooxo wdajir ihi uga shaqeynaynayeen sharciga iyo amniga, dib u eegista dastuurka iyo xuquuqul insaanka. Waxaan mar horeba u shaqaynayney sidii hal koox maarayn sare oo Qaramada Midoobey ah.

Qoyskeenna Qaramada Midoobey ee Soomaaliya waxay la kulmeen xaalad mugdi ah kaddib markii Xarunteenna Qaramada Midoobey la weeraray 19kii Juun. Waxaa naga dhintay hal qof oo ka mid ahaa shaqaalaha UNDP iyo todoba qandaraasle iyo ilaalo iskugu jirey. Musiibadaasi waxay sii xoojisey go'aankeenna iyo ka go'naansheheenna howshan.

Waxaan dib u eegis ku samaynaynaa habaynta amniga shaqaalaheenna, waxaanan si degdeg ah ugu baahan ahay awood ciidan waardiye ah oo si buuxda u shaqaynaysa sida ay ku taliyeen Goluhu. Layliga bartilmaameedka AU-UN wuxuu eegay dookhyada qaar, kuwaas oo hadda la tixgelinayo.

Waxaan jeclaan lahaa inaan idiinka tago saddex farriimood oo muhiim ah oo goluhu tixgalinayo:- Kow: Soomaaliya shacabka, dowladda iyo saaxiibbada caalamka, waxay qarka u saaran yihiin inay gaaraan guulo waawayn; runtii waxyaabo waawayn. Marka la eego dib u dhiska qaran burbursan iyo ka samata-bixinta colaado iyo faqri ee malaayiinta qof, waxaan qarka u saaran nahay guul wayn; - Marka labaad: meesha aan taagan nahay sidoo kale waa khatar. Guusha lama dammaanad qaadi karo. Si kasta oo loo dhigo ''dhibaatada'' Soomaaliya weli ma dhammaanin.

Ma awoodi karno inaan hoos u dhigno diiraddeenna ama maalgelinta - inkastoo ay jiraan sheegashooyin badan oo ku tartamaya dareenkeenna adduunka intiisa kale. Haddii aan guuldarraysano oo Soomaaliya dib ugu sibxato in Al Shabaab adkaato, waxaan dareemi doonnaa saamaynta amni min Bamako ilaa Bangui, iyo meelo ka baxsan Afrika. Aragtida (xag.jirku) ma ixtiraamto xuduud. - Marka saddexaad, si aan uga gudubno heerka ugu hooseeya oo aan u higsanno waxyaabo waawayn, waxaan u baahan nahay wax intan ka badan.

Wax badan ayaa laga bixiyey dhanka taageerada – iyo weliba ballan-qaadyo badan – balse waxaa jira saddex arrimood oo loo baahan yahay in aan dadaalkeenna kor ugu qaadno haddii aynaan fashilmin: Kow, taageeridda ciidamada Nabad-Sugidda Qaranka Soomaaliyeed (ma aanan gaarin heer aad u muhiim ah) xagga dhisidda awooddooda; Marka labaad, la xoojiyey awoodda AMISOM; Marka seddexaad, waa xoojinta iyo maalgelinta doorka Qaramada Midoobey ee istaraatijiadda bixitaanka AMISOM (tan waxaa ka mid ah taageerada UNSOM iyo UNSOA iyo sidoo kale shaqada hay'adaha Qaramada Midoobey ee Soomaaliya). Ka shaqaynta Soomaaliya waa qaali.

Badbaadada shaqaalaheennu waxay ku kacaysaa lacag run ah. Xaqiijinta guushu waxay ku kacaysaa kharash badan, laakiin aad uma badna marka loo eego waxa ay beesha caalamku ku bixisay Ciraaq, Afgaanistaan iyo dhowaanahan Mali. Guuldarrada Soomaaliya, si kastaba ha ahaatee, waa mid weli khatar ah. waana khatar aynaan awoodin inay dhacdo.

Waad ku mahadsan tihiin dareenkiinna.